Xadhig Jiid



Yvonne Winer

Connie Bull

Xadhig Jiid

retold by Yvonne Winer
illustrated by Connie Bull

Waxaa jasiirad yar ku noolaa Jeer, Maroodi, iyo Bakayle.

Jeertu dhinac ayay kaga noolayd jasiiradda, halka Maroodiguna uu dhinaca kale kaga noolaa, Bakayluhuna waxa uu ku noolaa badhtamaha buur.

Bakayluhu waxa uu ka cadhooday Maroodiga iyo Jeerta, sababtoo ah way u awood sheegteen. Markaa wuxuu sameeyey qorshe xariifnimo si uu u siro.

Waxa uu soo heley maydhax waxana uu si taxaddar leh uga soohay xadhig dheer.



Marka koowaad, wuxuu u tagay Maroodiga oo ku yidhi, “Maroodi, waxaan aaminsanahay inaan kaa xoog badanahay.”

Maroodigii ayaa qoslay oo dhahay, “Nacas Bakayloow, aad ayaan kaaga ballaadhanahay, markaa waa inaan kaa xoog badanahay.”

Bakayle ayaa dhahay, “Aan kuugu xidho xadhiggan, waxaanan caddayn doonaa inaan kuu jiidi karo buurta.”

Maroodi ayaa ku qoslay markii uu Bakayle ku xidhxidhay xadhiggii.

“Waxaan cidhifka kale ee xadhigga kula dul ordi doonaa buurta,” ayuu dhahay Bakaylihii. “Marka aan gaadho figta sare waxaan ku qaylin doonaa, ‘Jiid’. markaa waxaad fahmi doontaa inaan kaa xoog badanahay.”

Markii xigtay, Bakayle wuxuu u cararay buurta oo uu dhinaca kale ee Jeerta uga dagay.

Wuxuu yidhi, “Jeereey waxaan rumaysanahay inaan kaa xoog badahay.”

Jeertii way qososhay oo ay dhahday, “Nacas Bakayloow, aad ayaan kaaga cuslahay, hubaashiina waan kaa xoog badanahay.”

Bakayle wuxuu dhahay, “Xadhiggan aan kuugu xidhoxidho. Waxaan caddayn doonaa waxaan kuu jiidi karaa illaa buurta.”

Jeertii way qososhay Bakaylihiina wuxuu ku xidhxidhay xadhiggii.

“Waxaan cidhifka kale ee xadhigga kula dul ordi doonaa buurta dusheedea.” ayuu dhahay Bakaylihii. “Markaan gaadho figta sare ee buurta waxaan ku qaylin doonaa, ‘Jiid’. kaddibna waad ogaan doontaa inaan kaa xoog badanahay.”

Markii uu Bakayluhu buurta dusheeda ka arki karayay Maroodiga iyo Jeerta , wuxuu ku qayliyey, “Jiid.”

Xadhig jiidkii ayaa bilowday!

Maroodigii wuu jiiday oo la jiiday and uu cusleeyey. Wuxuu jiiday Jeertii kala badh illaa buurta.

Kaddib Jeetii way soo jiidday oo gunuunucday oo ay halgalntay, illaa ay ku soo jiidday Maroodigii kala badh xagga buurta.

Siday hadba Maroodiga iyo Jeertu isku jiidayeen, Bakaylihii wuu qoslay. Kaddib wuxuu soo qaatay dhagax afaysan oo xadhigii ayuu dhexda ka kala jaray.

Jeertii iyo Maroodigii waxay ku dheceen badda oo ay aad u fatihiyeen!

Waxay moodeen inuu Bakayluhu aad u xoog badanyahay, oo mar dambe umay awood sheegan.



EraBooks